



Warar Cusub oo Ku Saabsan Fursadaha Waxbarashada Iskuulada Lagu Qaadanayo oo Kooban

Oktoobar 15, 2020

Waalidiinta iyo Shaqaalaha Qaaliga ee PPS,

Waxa aynu muddo dhowr todobaad ah ku jiray Waxbarashada Guryaha Lagu Qaadanayo, si la mid ah waxa aanu ka shaqeyney wajiyaada labaad sidii si tartiib ah lagu furihi lahaa iskuulada. Dugsiyada Dadweyanaha Portland (PPS) waxa ay si feejigan diirada u saarayaan qiyaasaha caafimaadka degmada ee la daabaco iyo kuwa gobolka iyo waliba [khabiiradeena caafimaadka](#). Waxa aan sii wadi doonaa inaan u hoggaansanaano tilmaamaha ay bixiyaan Waaxda Waxbarashada Oregon inta aanu ka fikirayno sidii aan u soo bandhigi lahayn fursadaha waxbarashada iskuulka lagu qaadanayo oo kooban. Iyada oo aan ka walaacsanahay in dhammaan aan ardaydeena ku soo celino dhismayaasha iskuulka, waxa aan sii wadi doonaa sidii aan caqli ugu dari lahayn inaan mudnaanta kala horeysiino dhinaca caafimaadka iyo nabadgelyada ardaydeena iyo shaqaalaha.

Sidii aan hore idiinla wadaagnay todobaadkii la soo dhaafay, waxa aan sii wadi doonaa waxbarashada ay ardaydeenu ku qaadanayaa guryaha ilaa bisha Janaayo 2021. Awoodeena aan ku furayno si dhammeystiran fasalada waxa ay ku xiran tahay gaar ahaan qiyaasaha caafimaad ee Degmada Multnomah, taasi oo ku xiran iyaduna sida ay bulshadeenu u fuliso tallooyinka loo soo jeediyo inay raacaan, oo ay ka mid yihiin inay afka daboolaan. Waxa inaga xiga kaliya bilo sidii aan dib ugu furi lahayn dhismayaasha iskuuladeena oo macno leh, xitaa haddii ay noqonaysa waxbarashada isku dhafan/waxbarashada loo qaadanayo kooxaha.

Haddaba, waxaa jira fursado ardayda la iskugu keeni karo kooxo yar oo kooban iyo barnaamijyada iskuuladeena. Dhowrkii todobaad ee ugu dambeeya, waxa aan la kulanay hoggaamiyaasha iskuuladeena iyada oo aan kala tashanay [qorshihii dhabta ahaa](#) ee aan dib ugu furi lahayn iyo sidii go'aan looga qaadan lahaa wajiba hore ee waxyaabaa lagu siin karo iskuulada tirada kooban ee ardayda ah. Tusaale ahaan, Xarunta Caafimaadka Ardaydu hadda waxa ay ka furan tahay Dugsiga Sarre ee Roosevelt, waxa kale oo noo qorsheysan in aanu furno Xarunta Fayo-qabka Dugsiga Sarre ee Farsamada Benson dhowrka todobaad ee soo socda. Waxaan sidoo kale furnay Xarunta Qiimeynta Waxbarashada Gaarka ah oo laga furay Dugsiga Pioneer iyo Dugsiga Hoose ee Dr. Martin Luthern King, intaas waxaa dheer qiimeynta xannaanada caruurta akhriska/qorista. Waxa aan sii wadaynaa inaan siino e [Taageerada Qoyska iyo Cuntadii Kala Gedisneyd](#) ee ardayda la siinayey oo dhammeystiran waqtiga lagu jiro in ay ardaydu waxbarashada ku qaataan guryahooda, waxaana ka mid ah in laga taageero dhinaca waxbarashada, taageerada ardayda, addeegyada isku xirka iyo inay dareemaan inay ka mid yihiin ardayda, taageerada qoyska iyo agabyada, iyo in si gaar ah loo taageero ardayda leh dhaqanada kala gedisan. Intaas wax dheer, waxa aan furnay 11 goob oo ka mid ah iskuulada oo bixinaya daryeelka caruurta. Macallimiinta iskuulada waa tegi karaan iskuulada haddii ay doorbidaan inay waxbarashada fasaladooda ka dhigaan qaabka online ah, waxa aan sii wadaynaa inaan cunto ka bixino 28 goobood oo



ka mid ah iskuulada, saddex maalmood todobaadkii.

Waxa jirta fursad aan dhawaan bixin doono sida ugu dhakhso badan taasi oo ah in **tababar la siiyo ciyaaryaha fudud ee dugsiyada sarre oo tiradoodu kooban tahay. Laga bilaabo maalinta Tallaadada, bisha Oktoobar 20keeda**, ardayda ciyaaraha fudud ee dugsiyada sarre ee PPS waxa ay u kulmi doontaa iyaga oo tiro kooban, kulanada tababarada jimicsiga bannaanka oo ay joogaan tababarayaashu. Kulanadu waxa ay noqon doonaa **bannaanka kaliya**, iyada oo ardaydu ayna gali doonin gudaha dhismayaasha iskuulada. Ardayda waxaa looga baahan inay noqdaan todobaadkiiba koox aan ka badan 25 ciyaaryahan kooxdiiiba, iyaga oo tababaran doona shuruudaha inay kala fogaadaan iyo waliba inay xirtaan afka waqti kasta oo ay tababar ku jiraan. Waalidiinta Dugsiyada Sarre waa in ay helaan macluumaad dheeraad ah maalinta Jimcaha.

Waxa kale oo intaas dheera fursado tababarada ciyaaryahanada dugsiyada sarre oo kooban, waxa aan isku dubaridnay saddex kooxood oo wada shaqeynaya oo kooban sidii ay uga wada hadli lahaayeen sida ardayda loo siin lahaa fursado waxbarasho iyaga oo kooxo kooban ah. Marka aan u helno warar dheeraad ah, waxa aan sii wadi doonaa in aan idinla socodsiino wixii cusub ee soo kordha.

Kuwani dhammaan wa tallaabooyin yar yar, laakiin kuwa muhiimka ahi waxa weeye in aan ku faraxsanahay inay bilaabantay inaan aragno ardaydayadii iyaga oo joogo dhismayaasha iskuulka mar labaad. Sidii caadada ahayd, waxa aan sii wadi doonaa bilaabno fursadihii in ay ardaydeenu ay iskuulada wax ku baran karaan kaliya marka aan aamino in aan si nabadgelyo ah u samayn karno. Waxaa mar walba mudnaantayada koowaad ah caafimaadka iyo fayyo-qabka ardayda iyo shaqaalaheena.

Waxaan ka mahadcelineynaa deganeenshaha, dabacsanaanta ardayda iyo waalid ahaanba, iyo inaka oo dhammaanteen raadinaya sidii aan uga bixi lahayn caqabadaha si wada jir ah waqtiyadani isbedelaya. Mahadsanid.